


## Caafimaadkaaga iyo Uumiga Aan la Rabin (Vapor Intrusion)

Meesha aad ka shaqayso waxay ku taalaa aag Hay'adda Xakamaynta Dikhawga ee Minnesota ay ka qabanayso baaritaanka uumiga aan la rabin.

### Waa maxay Uumiga Aan la Rabin?

Kiimikooyinka ku daatay ama lagu qubay dhulka ayaa wasakhayn kara carrada iyo biyaha dhulka hoostiisa. Iskudhisyada orgaaniga ah ee aan degganayn (VOCs) waa khiimikooyin si sahlan ugu uumibaxa hawada. VOCs-ga ka yimaadda carrada ama biyaha dhulka hoostiisa oo wasakhaysan ayaa ku abuuri kara uumiyo kiimikaad dhulka hoostiisa.

Haddii uumigani soo gaadho dhisme, wuxuu ka gali karaa dillaacyada seeska, qasabadaha agagaarkooda, iyo nidaamka bullaacadaha. VOCs ayaa markaa wasakhayn kara hawada gudaha. Nidaamkan - marka wasakhawgu ka yimaado hawada carrada ee uu yimaado hawada gudaha - ayaa loo yaqaan uumiga aan la rabin.



### Miyey tahay inaan ka walwalo?



Haddii goobtaada shaqada ayna saamayn ku yeelato uumiga aan la rabin, dadka dhismaha ku jira ayaa neefsan kara hawada wasakhaysan. Caadi ahaan, qaddarka kiimikada ee soo galaysa dhisme kana imanaysa uumiga carro wasakhaysan dhibaato caafimaad kuma laha dadka badankooda. Hase yeeshee, xiitaa xaddiyo yaryar oo kamid ah waxyaalaha wax wasakheeya waxay u yeelan karaa dhibaato caafimaad dadka nugul, gaar ahaan **dumarka uurka leh ama uur yeelan kara**. Haddii aad tahay qof nugul oo si joogta ah u deggan dhisme uu uumiga aan la rabin uu ka jiro, fadlan u sheeg Waaxda Caafimaadka ee Minnesota.

## Su'aalo? La xiriir Waaxda Caafimaadka ee Minnesota

Cutubka Qiimaynta Goobta iyo La-talinta

Wac (651) 201-4897 ama limeyl u dir [health.hazard@state.mn.us](mailto:health.hazard@state.mn.us)

<http://www.health.state.mn.us/divs/eh/hazardous/topics/vaporintrusion.html>